Maanta kiis cusub oo COVID-19 ah lagama soo gudbin gobolka Niyuu Baraaniswik. Waqti xaadirkaan, Niyuu Baraaniswiik waxaa ka jira 17 kiis. Dhamaan kiisaskaas oo dhan waxaa ay la xiriiraan safari ama kiis la xaqiijiyey kaasoo u safrey meel ka baxsan gobolka.

Diktoor Jennifer Russell, Sargaalka Madaxa Caafimaadka, waxey u mahad celisey, reer Niyuu Baraaniswiik dadaaladooda joogtada ah oo ay ku yareynayaan faafitaanka cudurka sidoo kale waxaan ka warqabaa in taburucaad badan lasameeyey si hoos loogu dhigo kobcida ama kororka cudurka.

Waxaa ay xitaa bogaadisey xirfadlayaasha caafimaadka iyo kuwo kale ee ka shaqeeya qaab dhismeedka caafimaadka.

“Waa in aan illaalinaa shaqaalaheena caafimaadka, si ay u sii wadaan hawshaan muhiimka ah,” ayaa waxaa yiri Diktoor Jennifer Russell. “Marka aan qaadno tallaabooyin ama ficil aan ku xadideyno cudurka, kuwa naga illaalinaya waa shaqaalaheena safka hore ku jira ku waasoo xaaladaan qiimo weyn ku leh. Marka aad joogtid guriga aadna hirgelineysid kalla fogaansha dadweyne, kelli ah ma illaalineysid naftaada, ee waxaad illaalineysaa dadka laga yaabo in ay si dhaqsi leh ay naftaada u bed baadin lahaayeen.”

Russell xitaa waxaa ay ku dhawaaqdey sheybaarka yaala Isbitaalka Jaamacada ee Dr. Georges-L.-Dumont ee fadhigiisu yahay Mokton in uu hada awoodo in uu bixiyo xaqiijintii ugu danbeysey ee tijaabo kasta oo lagu dhimeystiro Niyuu Baraaniswiik, ayadoo aysan lagama maarmaan aheyn in loo diro sheybaarka qaranka ee gobolka Winibeg. Tani waxey xawaaro ku dareysaa hanaanka ama qaabka tijaabada iyo xaqiijinta ee gobolka. Ka dib marka tijaabada dhiman kuwasoo aan mar hore dirney ay soo laabtaan, gobolka wuxuu ku dhawaaqi doonaa natiijada in cudurka qofka laga heley iyo in laga waayey ayada oo aan loo baahneyn qeyb saadaalineed.

“xitaa waxaa muhiim ah in aad dib u raacno dadyowga ama kuwa xiriir la sameeyey dadka uu xanuunku saameeyey,” ayaa waxaa yiri diktoor Russell. “Kiis uu qofkiisa ka imaadey Jasiirada Birinsi Idhwaad ayaa saameyn ku yeeshey Niyuu Baraaniswiik. Bukaanka caalamado ayaa ka muuqdey Maarso 16, keedi markii ay kasoo safreyna Toronto illa Mokton ayna soo raaceen Diyaarada Westjet 3456. Waxaan kalsooni ku qabnaa in ay kooxda PEI ee caafimaadka bulshada ay qaadeen tallaabooyin ay dib ugu raacayaan dadkii xiriirka la sameeyey laakiin waxey xitaa doonayaa in ay dib u daalacaan dadkii kusoo safrey duulimaadkaas ayna tahay in ay dadka ay is godoomiyaan mudo 14 cisho ah.”

Masuulka la yiraahdo Baleyn Higis ayaa wuxuu u mahad celiyey ganacsatada ku waasoo la jaan qaadaya xaaladaha deg degta ah iyo awaamiirta waajibka ah si ahmiyad loo siiyo caafimaadka iyo bedqabka ee shaqaalahooda, keliyintiga iyo dhamaan reer Niyuu Baraaniswiik.

“waaxda bedqabka bulshada ayaa waxaa ay kontoroolayaan ganacsiyada guud ahaan gobolka waxeyna heleen in ay 94 boqolkiiba ay u hogaansan yihiin awaamiirta.” Ayaa waxaa yiri Higis.

“Majiro qof doonaya in uu awaamiirtaan ka dhigo kuwa uu sharciga dadka ku qasbayo taasoo wadata xukumo iyo ganaaxyo, balse waxaan diyaar u nahay in aan sameyno waxa looga baahan

yahay in uu qofkasta raaco ama uu u hogaansanaado," ayaa waxaa yiri Higis. "Waxaan si qaas ah oga walaacsan nahay qaabka uu ganacsigeenu u howlgalayo ayadoo lala qabo awaamiirta iyo shaqsiyaadka looga baahan yahay in ay si shaqsi ah isku go,doomiyaan kuwaaso hadana sameynaya wixii la amrey. Anagu idinma lihin in aad arinta si qafiif ah u sameysaan. Waan ognahay in ay saameyneyso ganacsigiina. Laakiin waa weji gabaxnimo hadii aanan ganacsiyada aas aasiga ah aysan u hogaansamin waa hadii aan dooneyno in aan fidino ama toosino qalooca."

Wararkii ugu danbeeyey ee COVID-19 ayaa waxaa laga heli karaa onleynyada.

Akhbaaraadka kale ee laxiriira jawaabta feyraska waxey isugu jirtaa:

Leen akhbaareed iyo iimeelo

Leen akhbaareed iyo iimeelo oo lacag la,aan ah, kuwaasoo bixiya adeegyo oo ku baxaya labada luuqadood, ayaa la hagaajiyey si ay dadka oga caawinto jawaabaha su,aalaha aanan la xiriirin caafimaadka, kuwaasoo isugu jira in loo hogaansamo xaalada deg degta ah. Numberka,1-844-462-8387, waa mid shaqeeya 7, da beri ee asbuuca laga billabo 8:30 a.m. to 4:30 p.m. cinwaanka iimeelkuna waa helpaide@gnb.ca. walaaca ama cabashooyinka la xiriira bedqabka goobta shaqada waa in ay socotaa si loogu jeheeyo bedqabka goobta shaqada ee Niyuu Baraaniswiik.

Adeega Niyuu Baraaniswiik

Adeega Niyuu Baraaniswiik waxey Bixinayaa in ka badan 400 oo adeeg oo ayna siinayaan bulshada ayaga oo matalaya waaxyaha dowlada iyo hayadaha. Aqlibiyada hawlahaan waxaa lagu bixindoonaa si onleyn ah iyo si taleefoon ah. Si kastaba, adeegyada qaar waa in loo sameeyaa si shaqsi ahaan ah

Manta, xarumo xadidan oo adeegyada Niyuu Baraaniswiik ah ayaa dib loo furey si ay u bixiyaan adeegyada aas aasiga ah. Macaamiisha waa la baari doonaa ka hor inta ay soo galin xarunta iyo hadii waxa ay u socdaan aysan aheyn daruuri, ama lagu sameyn karo si onlayn ah ama taleefoon, markaasna looma ogolaan doona in ay galaan. Adeegyada daruuriga ah ee laga bixiyo xarunta waxaad ka dheehan kartaa shabakada qadka ee Niyuu Baraaniswiik.